## Adeegyada daryeelka muddada dheer

ADRCs iyo xafiiska la shaqeeya Beelaha waa sidaad ku heleyso barnaamijyada dowladda ee muddada-dheer. Markaad tixgelineyso xarun nolosha la isku caawiyo, guryaha waayeelka, ama haddii aad joogeyso gurigagaa, xafiiska deegaanka ayaa kaala hadli kara si ah bilaash iyo eexla'aan.

## Waxaan kugu caawin karnaa:

- Qiimeynta heerka baahidaada ee adeegyada.
- Inaa ogaato fursadahaaga dhaqaalaha.
- Faham siday u xadeysan yihiin barnaamijyada ay dawladdu maalgeliso.
- Qorshehaaga mustaqbalka.

## Inaad fahamto siyaabaha laguu caawin karo

- In aad ka digtoonaan karto waxyaabaha muhiimka ah ee la tixgeliyo
- In aad tixgeliso fursadaha daryeelka muddada-dheer ee laguu heli karo
- In aad go'aan gaarto adigoo xogogaal ah

**La xiriir ADRC deegaanka ama xafiiska la shaqeeya Beelaha si ay kuugu hagaan tasiilaadyo.**

Aging and Disability Resource Center

### Nagala soo xiriir


555 Example Street Name
City Name, WI 55555

Monday - Friday
8 a.m. - 4:30 p.m.

1-844-WIS-ADRC
(1-844-941-2372)

name@namecounty.gov
namecounty.gov/adrc


**Sawiro calaamadda**
FindMyADRC.org


WISCONSIN DEPARTMENT of HEALTH SERVICES
P-03712ESO (03/2025)



Guryaha xannaanada waayeelka, xarumaha la isku celiyo nolosha, iyo xarumo ah degmo bulsho iyo guryaha iskorsaarka ee ah degaan daryeel waa in ay koobbi ah buugyarehaan ku siiyaan dadka mustaqbalka soo degi doona marka laga rabo qoraal ku saabsan xaruntooda. Bixinta buugyarahan waxaa ku qoran macluumaadka iyo siigudbinta la iska rabo ee Wis. Stat. ch. 50.

**STATE OF WISCONSIN**
**DEPARTMENT OF HEALTH SERVICES**

# Meel kasta oo aad ka dhiganeyso "guri"

(Wherever you call "home")

## Wax baad kala dooran kartaa.



Aging and Disability Resource Center

Markaad tixgelinayso
daryeelka muddada-dheer
*Waan kugu caawin karnaa*

Wax baad kala dooran kartaa...

# Waxaan Kugu Caawineynaa

Markaad raadineyso adeegyada daryeelka muddada-dheer iyo taageerada Aging and Disability Resource Center (Xarunta Tasiilaadka Waayeelka iyo Naafada ama ADRC) ama xafiiska la shaqeeya Beelaha ayaa kuu hagi kara si bilaash ah.

Waxaa adkaan karta in la ogaado in uu go'aankaagu yahay kan kuugu fiican ee adiga ama qoyskaaga.

**Hel jawaabaha su'aalaha ay ka mid yihiin:**

- Sidee baan u joogi karaa gurigeyga?
- Ilaa intee ayey lacagteydu soconeysaa?
- Maxaan la iga caawin karaa?
- Maxay tahay in aan ka baaro xarunta?
- Sidee baan ku ogaan karaa waxaan awoodi karo?

**Keligaa ma noqoneysid.**

## Adigu ogow fursadahaaga

**Hagidda khabiirka**
Shaqaalaha xafiiska ayaa garanaya tasiilaadka iyo barnaamijyada, si aad u hesho daryeelka aad u baahan tahay.

**Diyaar ayaan kuugu nahay meesha aad noogu baahato**
ADRCs waxay u adeegaan deegaan kasta iyo Beelaha ee Wisconsin. Shaqaale xirfad leh ayaa diyaar u ah in ay kugula kulmaan gurigaaga, xafiisyadooa, ama meel kasta oo adiga kuu giican.

*Barnaamijyada daryeelka muddada-dheer ee Wisconsin ujeedkoodu waa in dadka lagu caawiyo in ay ku noolaadaan gurigooda ama guriga qoyskooda, markay macquul tahay.*

*Waxba nala kama iibsado. Lama shaqeyno shirkad ama alaabta warshadaha. Hel talooyin ah xor oo aan eex lahayn. Si aad caawimaad ku hesho waxa ay ka bilaabaneyso waa macluumaadka saxda ah.*

*Maanta la xiriir xafiiska ku qaabilsan.*

## Adeeg bilaasha ah

Waxaan kugu caawineynaa inaad kala doorato daryeelka muddada-dheer ee kuu fiican, oo noqon kara dookhaaga, iyo miisaaniyaddaada.

